

# SIDA LOO CODEEYO



*Codka aad bixinaysaa waa codkaaga—isdiiwaangeli, war hel, soco oo coday!*

## YAA CODAYN KARA?

Si aad Minnesota uga codayso, waa in aad tahay muwaadin Maraykan ah, ugu yaraan jira 18 sano. Maalinta Doorashada, aadna deganayd Minnesota ugu yaraan 20 maalmood.

Haddii dembi culus lagugu xukumay, waad codayn kartaa ka dib markaad dhammaysato dhammaan qaybaha xukunkaaga, oo ay ka mid yihiin tijaabo dembiile, siidayn waqtigii oo aan la gaarin, ama shuruudo kale sida magdhaw.

Waad codayn kartaa adigoo wali hoos jooga/kaa mas'uul yahay, haddii aan garsoore kaala noqon xaqqa aad u leedahay codbixinta.

## ISDIIWAANGELI SI AAD U CODAYSO

Waa in aad ka diiwaangashan tahay cinwaankaaga hadda si aad u codayso. Si aad isu diiwaangeliso ama diiwaangelintaadii hore wax uga beddesho, tag [mnvotes.org](https://mnvotes.org)

Sidoo kale waxaad iska diiwaangelin kartaa meesha doorashadu ka dhacaysa ee deegaankaaga Maalinta Doorashada. Waa in aad tustaa caddayn ah magacaaga iyo cinwaankaaga hadda. Wixii faahfaahin ah, booqo [mnvotes.org](https://mnvotes.org) ama wac 1-877-600-VOTE.

*waa socotaa eeg bogga gadaale...*

**Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota**  
[mnvotes.org](https://mnvotes.org) • 1-877-600-VOTE

# SIDA LOO CODEEYO



*...ka timid horay*

## ARAG TUSAALE AH WARQADDAADA CODBIXINTA

Si aad u aragtid musharixiinta iyo su'aalaha ku qornaan doona warqaddaada codbixinta, booqo [mnvotes.org](https://mnvotes.org).

## GOOBAHA IYO SAACADAHA CODBIXINTA

Si aad u hesho meesha aad ka codbixinayso, booqo [mnvotes.org](https://mnvotes.org). Goobaha codbixinta badankoodu waxay furan yihiin laga bilaabo 7da subaxnimo ilaa 8da fiidnimo.

## WAXA AAD SOO QAADANAYSO

Haddii aad ka diiwaangashan tahay in aad ka codayso cinwaankaaga hadda, uma baahnid in aad la timaadid aqoonsi. Haddii aad u baahan tahay in aad isdiiwaangeliso ama diiwaangelintaadii hore wax ka beddeshid, waad u baahan doontaa in aad tusto caddayn deganaanshahaaga ah intaadan codayn. Haddii aad rabto in aad ogaato wax intaa ka badan, booqo [mnvotes.org](https://mnvotes.org) ama wac 1-877-600-VOTE.

## HORAY UGU CODAY WARQADDA CODBIXINTA MAQANAHA

Horay ayaad uga codayn kartaa xafiiska doorashooyinka ee deegaankaaga laga bilaabo Jimce 21ka Bisha 9aad (September). Waxaad kaloo codsan kartaa in boosta laguugu soo diro warqadda codbixinta maqanaha. Si aad u heshid xafiiska doorashooyinka ee deegaankaaga ama aad u codsatid warqadda codbixinta maqanaha, booqo [mnvotes.org](https://mnvotes.org)

## SHAQADA OO LAGAA FASAXO SI AAD U CODAYSO

*Waxaad xaq u leedahay in shaqada lagaa fasaxo si aad u codayso, adiga oo aan lagaa goynayn lacag, fasaxa gaarka ah, ama fasax aad xaq u yeelatay.*



**Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota**  
[mnvotes.org](https://mnvotes.org) • 1-877-600-VOTE

## TAARIIKHAHA 2022

**DOORASHADA AASAASIGA**  
Talaada, 9ka Bisha 8aad (August)

**MAQNAANSO KU CODAY**  
Coday adigoo boostada ku soo diraya ama qof ahaan imanaya  
23ka Bisha 9aad (September) ilaa  
7da Bisha 11aad (November).

**ISDIIWAANGELI SI AAD U  
CODAYSO**  
Hory isdiiwaangeli ugu dambayn  
18ka Bisha 10aad (October)  
si aad waqti u hesho Maalinta  
Doorashada.

**MAALINTA DOORASHADA**  
Talaada, 8da Bisha 11aad  
(November)